

OGOW XUQUUQDAADA

VOTE
2022

Maadaama aad tahay codeeeye ah reer Minnesota, waxaad leedahay xuquuq badan—ogow xuquuqdaada waxa ay tahay!
IN AAD SHAQADA FASAX KA QAADATID SI AAD U CODAYSID

Waxaad xaq u leedahay in aad fasax shaqada ka qaadatid adiga oo aan lagaa goynayn lacag, fasaxa gaarka ah, ama fasax aad xaq u yeelatay.

IN AAD CODAYSID HADDII AAD SAFKA KU JIRTID 8DA FIIDNIMO.

Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid haddii aad safka ku jirtid waqti kasta oo ka horeeya 8da fiidnimo.

IN AAD ISDIIWAANGELISID MAALINTA DOORASHADA

Waxaad xaq u leedahay in Maalinta Doorashada aad isdiiwaangelisid si aad u codaysid haddii aad muujin kartid caddaynta loo baahan yahay ee deegaanka.

IN AAD HADAL KU SAXIIXDID

Waxaad xaq u leedahay in aad hadal ku caddaysid qofka aad tahay oo aad qof kale waydiisato in uu adiga kuu saxiixo haddii magacaaga aadan wax ku saxiixi karin.

IN AAD CAAWIMAAD WAYDIISATID

Waxaad xaq u leedahay inaad caawimo qofkasta weydiisato, marka laga reebo wakiilka loo shaqeeyahaaga ama ururkaaga shaqaalaha.

IN AAD GOOBTA CODBIXINTA CARUUR KEENI KARTID

Waxaad xaq u leedahay in aad caruurtaada keento si ay kuula codeeyaan.

waa socotaa eeg bogga gadaale...

Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.org • 1-877-600-VOTE

OGOW XUQUUQDAADA

VOTE
2022

...ka timid horay

IN AAD CODAYSID KA DIB MARKAAD DHAMMAYSATO XUKUN DEMBI CULUS

Waad codayn kartaa ka dib markaad dhammaysato dhammaan qaybaha xukunkaaga, oo ay ka mid yihiin tijaabo dembiile, siidayn waqtigii oo aan la gaarin, ama shuruudo kale sida magdhaw.

IN AAD CODAYSID HADDII AAD WALI KAA MAS'UUL AH HOOS JOOGTID

Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid haddii aad wali kaa mas'uul ah hoos joogtid, haddii aan garsoore kaala noqon xaqqa aad u leedahay codbixinta.

IN AAD CODAYSID ADIGA OO AAN CODKAAGA CIDI SAAMAYN KU YEELAN

Waxaad xaq u leedahay in aad codaysid adiga oo aan cid joogta goobta codayntu wax saamayn ah ku yeelan codkaaga.

IN LAGUU BEDDELO WARQADDA CODBIXINTA

Waxaad xaq u leedahay in lagu beddelo warqadda codbixinta haddii aad qalad ku samaysay warqadda codbixinta in taadan sanduukha ku ridin.

IN AAD CABASHO GUDBISO

Waxaad xaq u leedahay in aad cabasho qoraal ah u gudbiso goobtaada codbixinta haddii aadan ku faraxsanayn qaabka doorashada loo maamulayo.

IN AAD WADATID TUSAALE AH WARQADDA DOORASHADA

Waxaad xaq u leedahay in aad tusaale ah warqadda codbixinta la gashid waabta codbixinta.

IN AAD WADATID XEERKA XUQUUQDA CODBIXIYAHA

Waxaad xaq u leedahay in aad nuqul ah Xeerka Xuquuqda Codbixiyaha la gashid waabta codbixinta.



Xafiiska Xoghayaha Gobolka Minnesota
mnvotes.org • 1-877-600-VOTE